# Dawaynta Loogu Talogalay Caabuqa Qaaxada (TB) Qarsoon: Levofloxacin

Baaritaankaagu waxa uu muujinayaa inaad qabto caabuqa TB-da qarsoon, sidoo kale loo yaqaan "LTBI". Caabuqa TB-da Qarsoon macnaheedu waa jeermiska TB ayaa ku jira jirkaaga laakiin waxay u egtay jeermis hurda. Jeermiska TB-da qarsoon kuma weexyeelaynayo adiga oo umana gudbi karo dadka kale. Haddii jeermiska TB-du uu tooso oo uu noqdo mid firfircoon, markaa waxay kuu keeni kartaa jirro. Tani waxa lagu magacaabaa cudurka TB-da firfircoon. Waxad u gudbin kartaa TB-da dadka kale haddii aad qabto cudurka TB-da firfircoon. Qaadashada dawooyinka loogu talogalay caabuqaga TB-da qarsoon ayaa kaa caawin karta inaad ka hortagto jeermiska TB-da qarsoon inuu kugu soo kaco oo uu noqdo cudurka TB-da firfircoon.

Jeermiska qaaxada kugu dhacday ayaa ahayd qaaxada dawoyinka badan iska caabbisa (MDR TB). Qaaxada MDR waa marka jeermiska TB-du uu iska caabbiyo ugu yaraan laba kamida kuwa ugu waaweyn dawooyinka qaaxada. Jeermiska xooggan laguma dawayn karo dawooyinka aan caadi ahaan u isticmaalno inaan ku dawaynno LTBI. Sababtan darteed waxaad u baahan doontaa dawo ka duwan ta qofka qaba LTBI ee caadiga ah.

## Sideen uga hortagi karaa cudurka Qaaxada firfircoon?

Waxad qaadan kartaa dawo si aad uga hortagto inuu kugu dhaco cudurka qaaxada firfircoon. Levofloxacin waa dawo loo isticmaalo in lagu daweeyo LTBI. Waxay dishaa jeermiska qaaxada ee hurda kahor intaanay jirro kugu keenin. Waxay qaadan kartaa bilo badan dawadu inay ku disho jeermiska qaaxada maxaayeelay jeermiska ayaa xooggan. Qaado Levofloxacin inta goor iyo illaa inta dakhtarkaaga ama kalkaalisadaadu ay ku farto.

## Maxaan dawada u qaataa haddii aanan dareemayn jirro?

Jeermiska TB-da huruda ayaa aad u fudud in la dilo kahor intaanay toosin ee aanay kugu keenin jirro.

## Maxaa dhacaya haddii aanaan qaadan daawada?

Haddii aanad qaadan Levofloxacin, aad ka tagto maalmo aad u badan, ama aad joojiso qaadashada dawada kahor dakhtarkaaga ama kalkaalisadaadu intaanay ku dhihin sidaas, waxa laga yaabaa inaad la jirrto Qaaxada firfircoon. Waa muhiim in la dilo jeermiska si markaa adiga iyo qoyskaagu uu caafimaad qabo.

## Ka warran haddii aan qaatay tallaalka BCG?

BCG waxay ka ilaalisaa carruurta Qaaxada laakiin kaliya dhawr sano. Kama ilaalin karto qaadista LTBI ama cudurka qaaxada firfircoon. Haddii aad qaadatay BCG, waa inaad wali qaadataa dawada loogu talogalay LTBI si aad u ilaaliso naftaada iyo dadka kalaba.

## Ka warran haddii aanan iska bixin karin lacagta Levofloxacin?

Waydii dhakhtarkaaga ama kalkaalisada si ay kaaga caawiso inaad ka hesho dawada Qaaxada Barnaamijka Qaaxada ee Waaxda Caafimaadka Minnesota.



## Ka warran haddii aan guuro?

U sheeg dhakhtarkaaga ama kalkaalisada ka hor intaadan u guurin gobol ama magaalo kale. Waxay kaa caawin karaan inaad sii wadato daawada qaaxada ka dib markaad guurto.

## Maxay tahay inaan ka oggaado arrinta ku saabsan daawada LTBI?

- U sheeg dhakhtarkaaga wixii ku saabsan daawooyinka kale ee aad qaadato.
- Ha qaadan Levofloxacin 2 saacadood gudahood marka aad cunto ama aad cabto wax kasta oo caano leh ama ka samaysan, dawooyinka laab-jeexa (antacids) ama maltifiitaamiinnada(multivitamins).
- Haddii aad sonkorow qabtid, fiiri heerka sonkorta dhiiggaaga si joogto ah.
- Iska ilaali inaad uur yeelato inta aad qaadaneyso Levofloxacin. Wac dhakhtarkaaga ama kalkaalisada isla markiiba haddii aad uur qaado.

**Dadka intooda ugu badan waxay qaataan Levofloxacin dhibaato la'aan. Dadka qaar waxay yeesgaan dhibaatooyin, sida:**

- Calool qas ama matag
- Madax xanuun ama dawakhaad (madaxa wareer)
- Shuban daran
- Calool xanuun
- Finan maqaarka ah ama cuncun
- Maqaarka iyo indhaha oo jaale ah
- Xanuun, gubasho ama xoqid gacmaha ama lugaha
- Xanuunka muruqyadaada ama xubnahaaga
- Dareen niyad-xumo ama isbeddelka niyadda

**Haddii aad yeelato mid ka mid ah dhibaatooyinkan:**

1. Jooji qaadashada daawadaada.
2. Isla markiiba wac dhakhtarkaaga ama kalkaalisada. Ha sugin ballantaada xigta.



**Xusuusnow inaad qaadato daawadaada qaaxada.**
Haddii aad seegto maalmo badan, daawadu ma shaqeyn karto. Halkan waxaa ku yaal dhowr siyaabood oo aad ku xasuusan kartid:

- Dhig Levofloxacin meel aad ka arki doonto.
- Qaado dawadaada Levofloxacin isla waqti maalinta. Tusaale ahaan, ka dib markaad cadayato ilkahaaga ama ka hor intaanad seexan.
- Weydiiso qof inuu ku xasuusiyo.
- Ku calaamade jadwalkaaga ka dib markaad qaadatid Levofloxacin.
- Ku samayso xasuusin ama digniin taleefankaaga gacanta.
- Isticmaal sanduuqa xusuusinta kiniinnada.

Haddii aad seegto maalin kasta ha noqotee, qor si aad ugu sheegto dhakhtarkaaga ama kaalisadaada ballanta soo socota.

**Oofi dhammaan ballamahaaga caafimaadka.**
Dhakhtarkaaga ama kalkaalisada ayaa kaa caawin doona inaad hubiso inay dawayntaadu si fiican u socoto.

Ballantayda soo socota ee daawada Qaaxada (TB)

Taariikhda:

Wakhtiga:

Dakhtarka ama kaalisada:

Goobta:

Minnesota Department of Health
Tuberculosis (TB) Prevention and Control Program
P.O. Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414 | www.health.state.mn.us/tb

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac: 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo rogay.*